



*Home Hospice & Gosnell Memorial Hospice House*

Daryeelka hospice-ka gurigu waa nooc daryeel oo gaar ah halkaas oo kalkaaliyayaal, kaaliyayaasha hospice-ka, shaqaalaha bulshada, rumaysadka iyo shaqaalaha ruuxiga ah, la-taliyayaasha murugada, iyo tabaruceyaashu kuugu yimaadaan meel kasta oo aad ku nooshahay. Qalabka caafimaadka, daawooyinka, qalabka, iyo adeegyada kale ee taageerada ayaa la bixiyaa.

Hospice waxay ku taageertaa adiga iyo qoyskaaga caawinta aad rabto oo aad u baahan tahay. Xubnaha kooxdayada hospice waxay ku soo booqdaan meel kasta oo aad ku nooshahay, xitaa haddii aadan lahayn guri joogto ah. Kalkaaliso ayaa had iyo jeer diyaar u ah inay ka jawaabto su'aalaha oo ay maamusho calaamadaha.

Haddii adiga ama xubin qoyska ka mid ah aad dareenteen isbeddello caafimaad sida xanuun badan, neefta oo ku yaraata, jahawareer, ama miisaan lumis, daryeelka bukaan-jiifka ayaa laga yaabaa inuu kugu habboon yahay. Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa laga yaabaa inuu kugula taliyo daryeelka hospice ama waxaad naga soo wici kartaa si aad u go'aamiso inaad u qalanto adeegyada hospice.

Haddii aad leedahay caymis caafimaad, waxaanu dalacsiin doonaa caymiskaaga. Haddii aadan awood u lahayn in aad wax ku bixiso, waxaan siinaa adeegyo bilaash ah qof kasta oo ku nool Cumberland iyo Degmooyinka York.

Haddii aadan si fiican ugu hadlin Ingiriisiga oo aad leedahay turjubaan kuu gaar ah, fadlan si toos ah nooga soo wac 207-289-3649. Haddii aad u baahan tahay turjumaan, fadlan la xidhiidh bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga si ay kaaga caawiyaan tan. Haddii aadan lahayn bixiye daryeel caafimaad, fadlan noogu soo dir emailka [access@hospiceofsouthernmaine.org](mailto:access@hospiceofsouthernmaine.org) si aad u diyaarsato adeegyada tarjumaada.

MAIN OFFICE  
390 US Route One  
Scarborough, ME 04074

GOSNELL MEMORIAL HOSPICE HOUSE  
11 Hunnewell Road  
Scarborough, ME 04074

phone: (207) 289-3640  
fax: (207) 883-1040  
[hospiceofsouthernmaine.org](http://hospiceofsouthernmaine.org)